

Kabitaanka macdanta birta ee caruurta ku dhashay miisaan hoose iyo caruurta dhiciska ku dhashay

Caruurta dhiciska ku dhashay ama ku dhashay miisaan hoose (ka hooseeya 2 500 g) may helin inay kaydiyaan macdanta birta oo ku filan wakhtigi ay ku jireen caloosha hooyada. Koritaanka dhakhsaha ah ee caruur yar-yar oo badan leeyihiin ayaa keenta in ay iman karto gabaabsi macdanta birta ah.

Gabaabsi macdanta birta ah micnaheedu waa in kaydka macdanta birta ee ku jira jidhku yahay mid aad u hooseeya.

Macdanta birta ee ku jirta jidhka

Macdanta birta waa macdan lagama maarmaan u ah nololaha taas oo ku jirta dhamaan unugyada jidhka. Hawl-qabasho badan oo jidhka ah ayaa ku tiirsan inay jirto isticmaalida macdanta birta. Macdanta birta waxay laqama maarmaan u tahay koritaan shaqeeya iyo gubidda maaddooyinka nafaqada jirku qaato ee xubnaha jidhka oo dhan.

Inta ugu badan ee macdanta birta ee jidhka waxa loo isticmaalaa in lagu qaado ogsijiinta gudaha dhiiga.

Ka hortagida gabaabsiga macdanta birta

Si looga hortago in macdanta birta ee jidhku u dhamaato waxa macdanta birta la siiyaa caruurta ku dhalatay miisaan hoose iyo kuwa dhiciska ah muddo wakhti gudihiis ah.

Wakhtiga daaweynta

Haddii miisaanka ilmuhu ka yaryahay 1 500 g daaweyntu waxay bilaabantaa xilliga da'da 2-4 toddobaad waxayna joogsataa xilliga da'da 12 bilood.

Haddii miisaanka ilmuhu ka badanyahay 1 500 g daaweyntu waxay bilaabantaa xilliga da'da 6 toddobaad waxayna joogsataa xilliga da'da 6 bilood.

Talada dawo qaadashada

Mar kasta raac warqadda dhakhtarka.

Dawo qaadashada dhibcaha macdanta birta waxay la korodhaa xawaaraha koritaanka ilmaha.

| Miisaanka ilmaha | Talada dawo qaadashada maalin kasta |
|------------------|---|
| Ka yar 750 g | 1 dhibcood/24 saacadood |
| 750 - 1 500 g | 2 dhibcood/24 saacadood = 1 dhibic aroortii iyo habeenki |
| 1 500 - 4 000 g | 4 dhibcood/24 saacadood = 2 dhibcood aroortii iyo habeenki |
| Ka badan 4 000 g | 6 dhibcood /24 saacadood = 3 dhibcood aroortii iyo habeenki |

Intee ayaa la siinayaa dhibcaha macdanta birta

Haddii ilmaha loo naas-nuujiyo si dhammaystiran ama qayb ahaan waxa la siiyaa dhibcaha macdanta birta ah 2 mar/maalintii, aroortii iyo habeenkii.

Haddii ilmahu qaybta ugu weyn ka helo caanaha baddala caanaha hooyada waxa la siiyaa oo keliya dhibcaha macdanta birta ah 1 mar/maalintii.

Niferex® dhibcaha afka

Niferex waa dawo loogu talagalay daaweynta gabaabsiga macdanta birta ah (kaydka macdanta birta oo maran) iyo dhiig darada gabaabsiga macdanta birta ah (dhiig yaraan) laakiin xitaa sida xaalada halkan oo kale profylax marka la doonayo in laga hortago in ay bilaabanto gabaabsi macdanta birta ah.

Dhibcaha afka ee Niferex waxa ku jirta maadooyinka macaan ee sackarin iyo sorbitol iyo alkohool taas oo u hawl-gasha sidi qaadaha maadada dhadhanka liin-macaanta.

Quraarad dhibcaha Niferex ah waxa ku jira 30 ml milmid macdanta birta ah. Hal dhibic keliya oo Niferex ah waxa ku jira 1,5 mg macdanta birta ah. Si loo soo bixiyo hal dhibic, waxa quraarada loo qabanayaa foorar oo ka dibna si tartiib ah ayaa farta loogu dhufanayaa quraarada.

Dhibcaha Niferex waxa isku mar lala siin karaa biyo, cabibtaanka khudaarta ah ama waxa lagu walaaqayaa khudrad la shiiday. Macdanta birta ah waxay ogsaydh bixisaa markay la fal-gasho ogsajiin oo waxay markaasi keenta in qaadashadu xumaato.



Sidaas darged waa in macdanta birta ah la siiyaa sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagal ah ka dib marka dhibcaha laga soo bixiyo quraarada.

Cimri-dheeraanta quraarad la furay waa 3 bilood.

Dhibcaha macdanta birta waxay bar wasakh ah ku sameeyaan dharka.

Dhinaca waxyeellooyinka

Calool taag iyo shuban ayaa dhici kara. Saxaradu way midab madoobaan kartaa. Waxyeellooyinka kale ka eeg www.fass.se

Macdanta birta ah waxa la dhigayaa meel xafidan oo aanay ka soo qabsan Karin caruurto. Haddii ilmaha ay gashay macdanta birta ah oo aad u badan waa in lala xidhiidhaa daryeelka bukaanka.

erol ab

Tel: 0411-39185
www.niferex.se